


In la noqdo macmiil bangi

Si aad u noqoto macmiil bangi waxaa khasab kugu ah inaad muujisid kaarkaaga aqoonsiga oo aad ka jawaabto su'aalaha ku saabsan sababta aad ugu baahantahay koonto bangi. Waxaa halkaan lagugu soo gudbinayaa tusaale ku saabsan warbixinaha bangigu kaaga baahan yahay markaad tagto xafiis bangi.



Iscaddayn

Waa inaad mar kastaba caddaysaa qofka aad tahay.

1. Adigu waxaad isku caddayn kartaa aqoonsi Iswiidhan oo ansax ah, sida baasaboor ama kaarka aqoonsiga ee qaranka ama aqoonsiga elaktarooniga ee bangiga-BankID. Adigu waxaa kale oo aad isku caddayn kartaa kaarka ruqsada baabuur wadashada ee Iswiidhan.
2. Haddii aadan haysan dokumenti aqoonsi oo Iswiidhan ah waxaad qofk aad tahay ku caddayn kartaa baasaboor ajnabi ah oo weli ansax ah ama aqoonsi kale oo sawir leh taas oo dalka aad u dhalatay ku qorantahay. Tani waa inay ahaataa mid ay bixisay dawlad ama soo saare kale oo awood u leh. Fiiro gaar ah u yeelo in bangigu kaa codsan karo inaad tusto dumentiyo dheeraad ah.
3. Haddii aanad haysan dokumenti aqoonsi oo ansax ah waa inaad dokumentiyo kale oo ka yimi meel dhix-dhexaad ah oo la aamini karo aad ku caddayn kartaa qofka aad tahay iyo dalka aad u dhalatay.

Ardayda ajaanibka ah

Haddii aad tahay arday ajaanib ah waa inaad aqoonsigaaga ku muujisid sida kor ku xusan.

Waxaa intaasi dheer inaad u baahantahay:

- Sharci deganaansho ama fiise (ma khuseyso muwaadiniinta Midowga Yurub).
- Go'aanka qaadashada ee jaamicada oo waxbarashadani wakhtiga ay soconaysaa ay ku cadhay.

Baahida koonto bangi

Waxaa waajib kugu ah inaad sharraxdo sababta aad ugu baahan tahay koonto bangi iyo waxa aad u isticmaaleyso koontadaas.

Waxay noqon kartaa in mushahar ama gunno kale laguugu shubayo, inaad kirada ka bixineyo ama inaad kayd u isticmaaleyso.

Waxaa kale oo dhici karta in bangigu ku weydiyo su'aalo kale si wax dheeraad ah lagaaga ogaado macmiil ahaan.

Xaqa koonto bangi ...

Fursada in la helo koonto bangi, taas oo ay daboosho damaanad qaadka dawladeed ee lacag ku shubida, iyo adeegyada lacag bixinta ee aasaasiga ah waa kuwo mab'da ahaan u furan dadka oo dhan. Tani waxay khuseysaa iyadoo aan loo eegayn nooca dalka aad dhalashadiisa haysato iyo iyadoo aan loo eegayn inaad leedahay tobanka lambar ee iswiidhan.

...laakiin, mararka qaarkood waxaa bangiga ku khasbanaaneysa in uu kuu diido inaad koonto furato

Bangigu koonto ma furayo haddii:

- Bangigu aanu kuu aqoonsan karin qaab ku filan oo sugar
- Bangigu u arko in warbixinta aad soo gudbisay ee ku saabsan sababta aad u dooneysyo inaad koonto furato aysan ahayn mid dhammaystiran
- Bangigu inuu koontadaas kuu furao ay jebineyo qaanun ama xeer.

Bangigu wuxuu kaloo kuu diidi karaa inaad koonto ka furato haddii aad horay hab xun u la dhaqantay bangiga.

Xusuusnow in ...

- Adigu aad fahamto su'aalaha bangiga oo ka jawaabi karto kuwaasi. Sidoo kale waa inaad fahmi kartaa warbixinaha bangigu ku siiyo.
- Waa inaad xitaa fahamtaa macluumaadka aad ka hesho bangigan.
- Haddaad u baahan tahay qof kuu turjuma, waa inaad adigu qofkaas u soo kaxaysataa kulanka.
- Bangigu wuxuu ku weyddiin doonaa meesha ay lacagtaasi ka timid.
- Koontadaada iyo adeegyada kale ee lacag bixinta ma la oggola in uu isticmaalo qof kale iyadoo aanu jirin heshiis ku saabsan oo lala galay bangigan.
- Bangigu wuxuu kaloo ku weyddiin karaa su'aalo dheeraad ah ama shuruudo kale ayuu kugu xiri karaa.

Warbixin dheeraad ah

Wixii warbixin dheeraad ah waxaad kala xiriireysaa bangiga aad doonto.

Waxaa kaloo warbixin laga helayaa:

Baarlamaanka Iswiidhen:

Sharciga (2017:630) ku saabsan ka hortagga lacag-mayrista iyo maalgelinta argagixisanimada.

Ka sii akhriso www.riksdagen.se

Hay'adda kormeerka laamaha maaliyadda:

Hay'adda kormeerka laamaha maaliyada xeerarkeeda iyo talaabooyinkeeda ka hortagga lacag-mayrista iyo maalgelinta argagaxisada.

Ka sii akhriso www.fi.se

Ururka bangiyada**Iswiidhen:**

Warbixin ku saabsan
talaabooyinka ay bangiyadu
kaga hortegayaan lacag-
mayrista iyo maalgelinta
argagixisanimada.
Ka sii akhriso
www.swedishbankers.se

Riksgälden

Warbixin ku saabsan
damaanadqaadka lacagaha la
kaydsado
Ka sii akhriso
www.riksgalden.se



Svenska Bankföreningen
Swedish Bankers' Association

www.swedishbankers.se